



Qiyaasta tayada biyaha ee muhiimka ah oo la gaaray

Biyihii hada way u soo noqdeen kooxdii ugu horreysay oo ah 15 dugsi iyada oo qayb ka ah barnaamijka degmada ee lagu beddelayo tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” ee dhammaan 90 dugsi ee PPS. Dugsiyadan 15-ka ah oo horreeya waxay noqonayaan barnaamij tijaabo ah si uu kooxda tayada biyaha uga caawiyo ka guuleysiga dhibaatooyinka aan la filayn isla markaana si dheeraad ah loogu wanaajiyo hababkeena si ay noqdaan kuwo waxtar dheeraad ah leh iyada oo aanu u gudbayno qaybaha dugsiyo ee xiga.

Shaqada lagu beddelayo tuubada halka biyaha laga cabo ka soo baxaan “drinking fixtures” ee 15 dugsi ee xiga waxay bilaabmi doontaa muddo gaaban, iyada oo qandaraaslayaashu ay si dhakhso ah u gudbinta doonaan tartanka ay shaqada u galayaan ee qaybta saddexaad dugsiyada. Dugsiyada ku jira kooxda labaad waa: Beach K-5, Boise-Eliot K-8, Chavez K-8, Clarendon Head Start, Creston K-8, Dugsiga Dhexe ee George, James John K-5, Dugsiga Sare ee, King K-8, Dugsiga Dhexe ee Ockley Green, Peninsula K-5, Rosa Parks K-5, Sitton K-5, Vernon K-8 iyo Woodlawn K-5.

Shaqaaluhu waxay shaqayn doonaa galabtii, fiidkii iyo toddobaadyada dhamaadkiisa si la iskaga ilaaliyo carqadaleynta fasallada. PPS waxay qorshaynaysaa meelaha biyaha laga cabo “drinking fountains” iyo halka qasabadaha biyaha laga cabo ka soo baxaan ee jikada “faucets” ee ku yaala dugsiyada oo dhan la beddelo xagaaga 2018-ka. Tani kuma jiraan meelaha biyaha laga cabo “drinking fixtures” ee fasalka, taasi oo u baahan shaqo ballaaran iyada oo la beddeli doono wakhti dambe marka shaqada loogu hoggaansamayo Xeerka Naafada Maraykanka ay dhacdo.

Qorshe tallaabo-tallaabo ah si wax looga qabto tayada biyaha

Degmadu waxay adeegsanaysaa habka tallaabo-tallaabo ah si loo xanibo halka dhibaatooyinka kiimikada lead iyo copper heerkoodu sarreeyo ka imaanayaan. Waxay marka hore ka bilaabataa beddelaada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures”, ka dibna dib ayaa loo tijaabiyaa ka hor inta aanan loo gudbin tallaabada dhibaata badan isla markaana qaaliga ah ee furida derbiyada iyo beddaalada tuubooyinka biyaha. Iyada oo la adeegsanayo barnaamijka tijaabada ah, degmadu waxay xallisay inta badan arrimaha la xiriira tayada biyada ee 15 ee u horreeyay iyada la adeegsanayo beddelaada tuubada halka biyuhu ka soo baxaan oo kaliya.

-David Mayne